

## **Tilmaamaha Qaadida Baaritaanka Gooryaanka Pinworm Test Collection Guidelines (Somali)**

Gooryaanku waa bahal yaryar oo cad oo dheerarkiisu le'eg yahay  $\frac{1}{4}$  -  $\frac{1}{2}$  inji wuxuuna u eg yahay mirta bariiska. Waxaa mararka qaar lagu arki karaa gudaha ama geesaha dabada (futada) ilmaha iyo saxarada. Gooryaanadaan waxay ku nool yihiin gudaha xiidmaha yar. Nooca gooryaanka ee dhediga ah oo wayn ayaa kasoo baxda futada qofka cudurka qaba habbeenki waxayna ukumo ku dhashaa maqaarka dabada ku heerarsan. Tani waxay sababtaa cuncun iyo inuu qofku is xoqo. Gooryaanku wuxuu sidoo kale u gudbi karaa xubinta taranka dumarka ee ilmaha dhediga ah waxayna arrintaan ku keynaysaa cuncun.

Si aad u ogaato in cuncunka cunugaaga uu sababay gooryaan, ukumaha waa in lagu arkaa sheybaarka aalada soo dhaweynta. Aad ayay u yaryihii mana awoodi kartid inaad aragto haddaan la adeegsan aaladaas.

### **Waxaad u baahaneysaa**

Qaabka ugu wanaagsan ee lagu qaadi karo muunad ama muunada ukuma waa in la adeegsado agabka lagu qaado muunada gooryaanka. Agabka waxaad ka heli kartaa dakhtarkaaga ama Xarunta Adeega Sheybaarka ama Xarunta Carruurta ee Nationwide oo *Close to Home<sup>SM</sup> (Dhow Guriga)*.

### **Sida loo calaamadeeyo muunada**

Samee tallaabada 1 aad iyo 2 aad kahor inta aadan bilaabin qaadida muunada.

1. Magaca cunuga sharciga ah oo dhameystiran – buuxi magacyada koowaad iyo magaca labaad, hingaada saxda ah
2. Mid kamid ah aqoonsiyada gaarka ah ee soosocda:
  - Taariikhda dhalashada **ama**
  - Lambarka Aqoonsiga Bukaanka **ama**
  - Lambarka diiwaanka caafimaadka ee Nationwide Children's Hospital

3. Taariikhda muunada la qaaday (Bisha/Maalinta/Sanadka)
4. Waqtiga subaxdii ee la qaaday muunada (qor a.m)

Haddii aad agabka muunada ka hesho rugta caafimaadka ee Nationwide Children's, waxaa laga yabaa inay kusiiyaan calaamada diiwaanka EPIC si aad u isticmaasho.

### **Sida loo qaado muunada ayadoo la adeegsanaayo agab**

1. Aruuri muunada subaxda hore, isla markiiba marka cunugaagu soo kaco kahor inta uusan aadin musquusha uusana isdhqaqin.
2. Buuxi oo gee illaa meesha calaamada leh kadibna ku dheji tuubada muunada ee qalabka aruurinta.
3. U rog cunugaaga dhanka caloosha (dhabacdhabac) si loo kala qaado geesaha dabadiisa. Dabada waa inaysan lahayn saxaro (xaar). Haddii aad aragto saxaro, sug oo qaad muunada maalinta xigta.
4. Qalabka wuxuu wataa suuf ku dhegan afka tuubada agabka muunada. Ka qaad daboolka oo raadi erayada STICKY SIDE (QAYBTA WAX KU DHEGTA) ee suufka. Ku riix qaybta suufka ee wax ku dhegta **dusha** sare ee dabada (ha gelin gudaha) muddo dhowr daqiiqo ah. Soo saar suufka kadibna dib u geli tuubada. Dib ugu xir daboolka.
5. Geli tuubada bac caag ah oo la xiri karo. Hubi in calaamada tuubada ay si fiican u buuxsan tahay. Xir bacda.
6. Si fiican u farxalo.
7. Keen muunada laabka (sheybaarka) isla hal saac gudaheed. Haddii aadan sidaan sameyn karin, geli qaboojiye. Muunada waxaa qaboojiye lagu hayn karaa illaa 7 maalmood.

Haddii sheybaadhka uusan arki karin ukumada gooryaanka cunugaaguna wali dareemaayo cuncun, wuxuu u baahan yahay in mar labaad laga qaado baaritaan.

### **Dooqyada Geynta:**

U qaad muunada Xarunta Adeega Sheybaarka isla maalinta ee aad qaaday.

Inta lagu jiro maalinkii:

- Xarun kasta oo ah Adeega xarunta sheybaarka ama Xarunta National Children oo u *Close to Home<sup>SM</sup> (Dhow Guriga)* inta lagu jiro saacadaha ganacsiga joogtada ah. Haddii aad rabto inaad ogaato saacadaha ganacsiga iyo goobaha la geeyo muunada, wac Adeegyada Sheybaarka adoo ka wacaaya (800) 934-6575 ama booqo [NationwideChildrens.org/Lab](http://NationwideChildrens.org/Lab).
- Sheybaarka Nationwide Children's Orange ee ku yaala 555 S. 18th Street, Columbus, Ohio 43205. Saacadaha shaqadu waa Isniinta illaa Jimcaha, 8 da subaxnimo illaa 7 da fiidnimo iyo Sabtida, 8:30 subaxnimo illaa 3:30 galabnimo.

Fiidkii:

- Waaxda Ogolaanshaha Isbitaalka ee Nationwide Children's ee xarunta guud. Saacadaha geynta waa Isniinta illaa Jimcaha, 7 da fiidnimo illaa 11:30 habeynimo.

**Fadlan ha geynin muunada Waaxda Xaaladaha Degdega ah.**

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah, waydii dhakhtarkaaga ama kalkalisada, ama wac shaybaarka oo lambarkoodu yahay (800) 934-6575.